

# WOHN

# ABC

Somali



## Impressum:

Das Wohn ABC wird von der Tür an Tür-Integrationsprojekte gGmbH im Rahmen des bundesweiten Projektverbundes "WosU-reloaded" herausgegeben.

WosU-reloaded wird von der Beauftragten der Bundesregierung für Migration, Flüchtlinge und Integration und Beauftragte für Antirassismus gefördert und wird unter der Koordination von Tür an Tür-Integrationsprojekte gGmbH mit ZAM e.V., Diakonie Augsburg, moveGLOBAL e.V., Haus der Kulturen-Interkulturelle Begegnungsstätte e.V. und Afropa e.V. durchgeführt.

**Text und Konzeption:** Michelle Balthes, Corinna Höckesfeld

**Illustration:** Lisa Klimesch (Titelbild), Saliha Soylu

Koordiniert von:



Verbundpartner:



Gefördert durch:



Die Beauftragte der Bundesregierung  
für Migration, Flüchtlinge und Integration  
Die Beauftragte der Bundesregierung für Antirassismus

# Einführung

Für viele Menschen mit Flucht- und Migrationsgeschichte ist die Wohnungssuche mit vielen Hürden und Herausforderungen verbunden. Neben komplexen Anträgen und strukturellen Ausschlüssen sind es oftmals auch die Fachbegriffe, die eine erhebliche Hürde darstellen. Denn häufig fehlt ihnen das notwendige Fachvokabular, da Begriffe wie Bruttokaltmiete, SCHUFA oder Zählerstand nur selten in Sprach- und Integrationskursen erklärt werden.

Mit dem **Wohn-ABC** möchten wir daher eine praktische Orientierungshilfe bieten, um die Hürden zu überwinden und Sprachkompetenzen zu stärken.

Von *A wie Ablöse* bis *Z wie Zählerstand* finden Sie darin relevante Begriffe rund um das Thema Mieten und Wohnen erklärt.

Ziel ist es, die Sprach- und Handlungskompetenzen zu stärken und einen gleichberechtigten Zugang zum Wohnungsmarkt zu ermöglichen.

## **Das Wohn-ABC ist auch in weiteren Sprachen online verfügbar:**

- Arabisch
- Dari
- Deutsch
- Einfache Sprache
- Englisch
- Somali
- Türkisch
- Ukrainisch

Mehr Informationen unter:

[wohnprojekt-augsburg.de/angebote-unterstuetzung/informationen-downloads/](http://wohnprojekt-augsburg.de/angebote-unterstuetzung/informationen-downloads/)






# Begriffe rund um das Thema Wohnen & Mieten

- 1 Ablöse
- 2 Besichtigungstermin
- 3 Bewerbungsmappe
- 4 Dauerauftrag
- 5 Eigenbedarf
- 6 Erstaussstattung
- 7 Gemeinschaftsfläche
- 8 Haftpflichtversicherung
- 9 Hausmeister
- 10 Hausordnung
- 11 Heizkosten
- 12 Indexmiete
- 13 Kaltmiete

- 14 Kaution
- 15 Kündigungsfrist
- 16 Lüften
- 17 Mängel
- 18 Mieterselbstauskunft
- 19 Mietobergrenze
- 20 Mülltrennung
- 21 Nebenkosten
- 22 Online-Suche
- 23 Räumungsklage
- 24 Ruhezeiten
- 25 Rundfunkbeitragspflicht
- 26 Schönheitsreparaturen
- 27 SCHUFA-Auskunft
- 28 Sozialwohnung
- 29 Staffelmiete
- 30 Übergabeprotokoll
- 31 Ummeldung
- 32 Untermietvertrag
- 33 Voll möbliert
- 34 Warmmiete
- 35 Wohnberechtigungsschein
- 36 Wohngeld
- 37 Wohngemeinschaft
- 38 Zählerstand

1



# Ablöse

# Die Ablöse

Haddii alaabta guriga, sida jikada, ay hore u yaaleen guriga, lacag lagu heshiiyey ayaa la siin karaa kireystihii hore. Tan waxaa loo yaqaan wareejin. Haddii aad lacag ka hesho Jobcenter/Sozialamt, waa inaad u xaqiijisaa goor horeba Jobcenter haddii ay bixinayso beddelka iyo haddii kaleba.

2



# Besichtigungstermin

# Der Besichtigungstermin

Ballanta soo eegista ama soo eegista guriga waa ballan-qabsi aad ku soo eegi karto guriga iyada oo aan waajib kugu ahayn. Waxaad sidoo kale heli doontaa fursad aad ku waydiiso su'aalo ku saabsan kirada, alaabta guriga yaasha, iwm. Maadaama ay jiraan dad badan oo iyana doonays guriga, waxaad kordhin kartaa fursadaadda hadaad la timaado waraaqahaga oo dhamaystiran.




# Bewerbungsmappe

# Die Bewerbungsmappe

Waxaa jira badanaa dad badan oo lagu martiqaado ballanta soo eegista. Si markaa ballanta ka dib mulkiilaha gurigu u ogaado qofka aad tahay, waxaad samayn kartaa gal Waraaqahaga oo dhamaystiran ku jiraan oo aad la iman kartaa Marka ballanta soo eegista. Mulkiilaha gurigu wuxuu ka heli doonaa dhammaan macluumaadka muhiimka ah ee kugu saabsan adiga (iyo qoyskaaga) gudaha galka waraaqahagu ku jiraan.. Galka codsigu wuxu ka kooban yahay dukumeentiyada soo socda: Warqadda codsiga ee shakhsi ahaaneed, is-shaacinta kiraystaha, Warqadda Mushaharka, Warqadda SCHUFA



4



# Dauerauftrag

# Der Dauerauftrag


Si aad kirada ugu wareejiso wakhtiga loogu talagalay bil kasta, waxaad la samayn kartaa amar joogto ah bangigaaga. Markaas kirada ayaa si otomaatig ah looga wareejin doonaa koontadaada loona wareejin doona mulkiilaha guriga bil kasta.



# Eigenbedarf

# Der Eigenbedarf

Isticmaalka shakhsi ahaaneed (Eigenbedarf) waa mid ka mid ah sababaha ugu badan ee kiraystayaasha loo siiyo ogeysiiska baajinta/kansal gareynta. Isticmaalka shakhsi ahaaneed macnaheedu waa in mulkiiluhu uu joojin karo kireysiga haddii ay u baahan yihiin guriga iyaga naftooda ama xubnaha qoyskooda. Si kastaba ha ahaatee, ogeysiiska baajinta waa in uu ahaadaa qoraal oo uuna cadeeyaa cidda guriga loogu baahan yahay. Haddii aad heshay ogeysiis joojinta sabab ah isticmaalka shakhsi ahaaneed, waxaad xaq u leedahay in dib u eegis lagu sameeyo. Waxaa fiican inaad isla markiiba aado xarunta la-talinta.




# Erstausstattung

# Die Erstaussstattung

Haddii aad lacag ka hesho Jobcenter/Sozialamt oo aad u guurayso guri markii kuugu horeysay (tusaale, maxaa yeelay waxaad hore u deganayd guri la wadaago oo aadan haysan wax alaab guri ah), waxaad codsan kartaa alaabaynta hore ee guriga. Tani waa codsi aad hal mar ku dalban karto lacagta alaabta guriga iyo shey-yada guriga (sida suxuunta, nalalka, roogaga, talaajadda, iwm.). Lacag hal mar ah ayaa la bixiyaa iyadoo loo eegayo tirada dadka, baaxadda guriga dabaqa iyo qalabka loo baahan yahay. Cadadka lacagta waxay ku salaysan tahay qiimaha alaabta guriga ee la isticmaalay. Alaabaha guriga ee horay u yaalay waa in la qeexaa.

7




# Gemeinschaftsfläche

# Die Gemeinschaftsfläche

Gudaha dhismaha guriga dabaqa ah, meelo badan ayaa laga yaabaa inay wadaagaan dhammaan dadka deggan. Tan waxaa ka mid ah jaranjarada, barxadda, beerta iyo sidoo kale aagagga maqaasiinka ama meesha guriga korkiisa ah. Inta badan waxaa jira caddayn la'aan ku saabsan isticmaalkooda, waana sababta ay tahay in lagula heshiiyo mulkiilaha guriga (qoraal ahaan haddii loo baahdo) meelaha la wadaago ee la isticmaali karo iyo sida loo isticmaalayo.





# Haftpflichtversicherung

# Die Haftpflichtversicherung

Caymiska mas'uuliyadda shakhsi ahaaneed (Haftpflichtversicherung) waa siyaasad caymis oo daboosha kharashyada waxyeleynta hantida iyo dhaawaca shakhsi ahaaneed. Taas macneheedu waxa weeye haddii aad si aan ula kac ah u dhaawacday dad kale (= dhaawac shakhsi ah) ama aad u waxyeelaysay hantida dad kale (= waxyeelada agab), waxaad u soo sheegi kartaa waxyeelada ka dhalatay shirkaddaada caymiska. Milkiilayaal guryo oo badan ayaa raba in kireystayaashu ay soo qaataan daboolista ceymiska mas'uuliyaddeed. Tani waxay siinaysaa ammaanka ku aadan ogaanshaha in kharashaadka la dabooli doono haddii ay wax ka jabaan gurigooda.

# Hausmeister



# Der Hausmeister


Ilaaliyihu (Hausmeister) waa qof ka masuulka ka ah maareynta, daryeelida iyo kormeerida dhismayaasha iyo guryaha kirada ah ee kale. Hawlaha waxaa ka mid ah, tusaale ahaan, dayactirro yar ku sameynta meelaha la wadaago, dayactirka jiilaalka iyo dhawrida meelaha cagaaran. Si kastaba ha ahaatee, iyagu mas'uul kama aha dayactirka gudaha gurigaaga. Waa inaad daryeeshaa cilladaha yaryar sida inaad adiguba iska beddesho guluubyada nalalka. Haddii ay dhacdo waxyeelo weyn, waa in aad soo wargelisaa mulkiilahaaga guriga.

# Hausordnung



# Die Hausordnung

Xeerarka gurigu waxay nidaamiyaan wada noolaanshaha dadka ku wada nool hoy-yeeynta ama guriga, tusaale ahaan. Xeerarka gurigu waxay ka kooban yihiin xeerar ay tahay in dhammaan dadka deggani ay u hoggaansamaan. Xeerarka gurigu waa qayb ka mid ah heshiiska kiraynta waana in la ilaaliyaa. Xadgudubyada soo noqnoqda ee ku aadan xeerarka guriga waxay keeni karaan digniin-siin. Kiraystayaasha ayaa sidoo kale laga joojin karaa heshiiskii guriga ogeysiis la'aan ka dib laba digniin-siineed.




# Heizkosten

# Die Heizkosten

Kharashyada kulaylinta waa kharashyada ku baxa kululaynta weybta dabaqa ama guriga. Waxaa ka mid ah kharashyada shidaalka iyo biyaha kulul iyo sidoo kale kharashyada kale ee soo baxa inta lagu jiro hawlgalka nidaamka kuleylka. Haddii aad lacag ka hesho Jobcenter/Sozialamt, kharashka kulaylinta waxa dabooli doona Jobcenter/Sozialamt. Si kastaba ha ahaatee, waa in si gaar ah loogu qoraa gudaha heshiiska kiraynta.



12




# Indexmiete

# Die Indexmiete

Marka laga hadlayo heshiiska kiraynta ee la xidhiidha tasmada, waxa lagu heshiiyey marka heshiiska la dhammeeyo in cadadka kirada mustaqbalka lagu saleeyo waxa ka soo cusboonaada qiimaha nolosha. Qodobka go'aan bixinta ah waa tasmada qiimaha ee uu xisaabiyay Xafiiska Istaatistikada Federaalka ee ku aadan qiimaha nolosha ee dhammaan qoysaska/guryaha gaarka ah ee Jarmalka, waxaa loola jeeda asal ahaan heerka sicir bararka.

13



# Kaltmiete

# Die Kaltmiete


Kirada aasaasiga ah waa qayb ka mid ah kirada oo ay kaliya ka mid tahay kharashyada isticmaalka goobta lagu noolaado. Ma jiraan kharashyo hawleed sida kharashyada kulaylinta, kharashka biyaha iyo bulaacada oo lagu daray kirada aasaasiga ah. Caddadka kirada aasaasiga ah waxaa lagu xisaabiyaa iyadoo lagu saleynayo mitirka laba jibaaran ee lagu siiyay.



# Kaution

# Die Kaution

Debaaji dhigidu waa deebaaji amni oo wuxuu ka ilaaliyaa milkiilayaasha guriga waxyeelada suurtagalka ah ama bixinta kirada ee qofka ku hadhsan. Caadiyan waxay ka kooban tahay saddex bilood oo kiro aan kharashaad dheeri ah lahayn waxaana lagu shubaa waxa loo yaqaan koontada deebaaji kirada bilawga kireysashada. Haddii aysan jirin wax khasaare ah oo ku imaada kirada ama waxyeelada guriga, waxaad heli doontaa deebaajiga markaad ka guureyso guriga.




# Kündigungsfrist

# Die Kündigungsfrist

Haddii aad rabto inaad ka gurto gurigaaga dabaqa, waa inaad ilaalisaa muddada ogeysiiska. Sida caadiga ah, tani waa saddex bilood. Ogeysiiska joojinta/dhameynta heshiiska waa in uu mulkiiluhu ku helaa qoraal ahaan maalinta saddexaad ee maalmaha shaqada ee bisha. Tan macnaheedu waa: Haddii aad rabto inaad gurto 31-da Maarso, waa inaad soo gudbisaa ogaysiiskaaga joojinta heshiiska ugu dambayn 3-da Janaayo. Dhererka muddada ogeysiiska ayaa sidoo kale lagu sheegay gudaha heshiiska kiraynta.






# Lüften

# Das Lüften


Guryaha la kireystay, kiraystuhu waa inuu si fiican u kululeeyaa oona u hawo siiyaa. Xaalado badan, hawo-siinta joogtada ah eena filan ayaa ka hortagi karta ka koritaanka caaryada ee gudaha qolalka. Haddii aadan si joogto ah u hawo-siin gurigaaga, waa inaad adigu iska bixisaa kharashaadka wixii waxyeello ah oo ay sababto caaryada iwm. Waxaa fiican inaad hawo-siiso 3-4 jeer maalintii ugu yaraan 5-10 daqiiqo. Waa muhiim inaad si buuxda u furto daaqada oo aadna damiso kuleyliyaha xilliga jiilaalka.



# Mängel

# Die Mängel


Haddii adiga ka kirayste ahaan aad ku aragto cillad guriga dhexdiisa, tusaale ahaan ogaanshaha cillad lahaanshaha falaashka musqusha, waxaa qasab kugu ah inaad qoraal ku ogeysiiso mulkiilaha guriga. Cilladaha waa in had iyo jeer lagu soo sheegaa qoraal ahaan, maadaama ay tahay inaad caddeyso in cilladda aad soo warisay. Dayactirka yar yar, sida qasabadaha tiqqaya, nalalka guluubyada ee jaban, iwm. waa in uu sameeyaa kiraystaha.



# Mieterselbstauskunft

# Die MieterSelbstauskunft

Milkiileyaal guryo oo badan ayaa raba macluumaadka ku saabsan kiraystayaasha mustaqbalka ka hor ama ka dib eegista guriga. Waxaad buuxin kartaa foomka is-shaacinta ee kiraystaha. Kani waa dukumeenti wata su'aalo ku saabsan xaaladdaada xirfadeed iyo mida shakhsi ahaaneed. Is-shaacinta kiraystahu waxay ka caawisaa milkiilayaasha guryaha inay wax badan ka ogaadaan kiraystayaasha cusub ee iman kara.



# Mietobergrenze

# Die Mietobergrenze

Haddii aad lacag ka hesho Jobcenter/Sozialamt, waxaad codsan kartaa in kharashaadkaaga kirada la daboolo. Kadib marka la hubiyo haboonaanta kirada, Jobcenter/Sozialamt waxay bixin doontaa kirada ilaa xad sare ee kirada. Xadka sare ee kirada ayaa sidaas darteed ah xadiga ugu badan ee Jobcenter/Sozialamt ay ku bixin doonto kirada guud (= kirada aasaasiga ah + kharashaadka kabka ah). Ismaamul-magaaleed iyo degmo kastaa waxay leeyihiin xadka sare ee kirada.





# Mülltrennung

# Die Mülltrennung

Kala soocidda qashinku macnaheedu waa in noocyada kala duwan ee qashinka la soo ururiyo oo si gooni ah dib loogu warshadeeyo. Tani waxay u fiican tahay deegaanka iyo dib u warshadaynta. Gudaha jarmalka, guri kasta waa inuu kala soocaa qashinka oo uuna ku ridaa qashin kasta qashin-qubka iyo weelasha saxda ah. Xeerarka kala soocida qashinku way kala duwanaan karaan iyagoo ku xidhan dawlada dhexe iyo maamulka deegaanka. Kala soocida qashinka ee khaldan waxay cawaaqib xun ku yeelan kartaa cimilada iyo la kulanka ganaaxyo sarsare.



# Nebenkosten

# Die Nebenkosten

Kharashyada kabka ah (= kharashyada hawlgalka) waa qayb ka mid ah wadarta kirada (= lacag-bixinada billaha ah ee ah kirada iyo kharaashadka dheeraadka ah). Kuwani waa kharashyada la xidhiidha isticmaalka hantida la kireysto. Tan waxaa ka mid ah, tusaale ahaan: qashin-qubida, ilaaliyaha, bulaacada ama nadiifinta jaranjarada. Mararka qaarkood kharashyada kulaylinta ayaa sidoo kale qayb ka ah kharashyada kabka ah. Kharashyada kabka ahi/kharashyada hawlgalku ayaa waxaa lagu qoraa gudaha heshiiska kiraynta.



# Onlinesuche

# Die Onlinesuche

Guryaha dabaqa ah badankood waxaa lagu xayeysiyaa onlaynka maalmahan. Markaad raadineyso guri dabaq ah, sidaas darteed waxaa macno leh in aad isticmaasho madalyaasha onlaynka ah sida immobilienscout24, ebay, immowelt iwm marka lagu daro ogeysiisyada iyo xayaysiisyada wargeysyada. Waxaad halkaas uga sameysan kartaa bog aqoonsi si bilaash ah oo aadna ka dejisan kartaa caawiye raadineed. Markaad isticmaasho habkan waxaad had iyo jeerba ku heli doontaa dhammaan soo bandhigyada guryaha dabaqyada ah ee cusub ee ku habboon boggaada aqoonsiga ee raadinta ah.



# Räumungsklage

# Die Räumungsklage

Mulkiilayaasha gurigu waxay xarayn karaan tallaabo guri ka saaris ah haddii kiraystuhu aanu ka bixin guriga uu kiraystay ka dib marka uu dhamaado wakhtiga ogaysiiska ama uu iska caabin ku sameenayo heshiis joojinta. Maxkamaddu waxay ku amreysaa in kiraystahu wareejiyo guriga dabaqa ah. Haddii kiraystuhu u hoggaansami waayo, guri ka saarid ayaa la amri karaa. Shardiiga ayaa ah in heshiiska guriga dabaqa ahi si dhaqangal ah loo joojiyay iyada oo la raacayo muddada ogeysiiska. Haddii aad hesho ogaysiiska guri ka saarista ka kirayste ahaan, waxaad xaq u leedahay inaad diido ama aad ka hortagto, tusaale adigoo oo bixinaayo baaqiga kirada ee kugu hadhsan. Way fiican tahay inaad isla markiiba raadsato talo si ay taas lagaaga caawiyo.






# Ruhezeiten

# Die Ruhezeiten

Gudaha Jarmalka, ma jiraan xeerar isku mid ah oo loogu talagalay xilliyada xasilloonida oo sharci ah. Waqtiyada ay kiraystayaasha iyo derisyadu ay tahay in ay si gaar ah isu tixgaliyaan midba midka kale waxaa dejiya dawladaha federaalka ah. Sida caadiga ah, xilliyada xasilloonida ayaa lagu habeeyaa gudaha xeerarka guriga. Xilliyada nasashada caadiga ah ee kujira gudaha xeerarka guriga waa sida soo socdaan: Nasashada wakhtiga habeenkii ah: 10-ka habeenimo ilaa 6 subaxnimo Inta lagu jiro wakhtigan, buuqa/qeylida sida dhegeysiga muusikada, hawlaha Adigu Samee (Do It Yourself, DIY), iwm. ayaa laga yaabaa inay ku dhacaan oo kaliya heer dhawaaqeedka aan qolka dhaafsaneyn.



# Rundfunkbeitrag

# Der Rundfunkbeitrag

Waxaa ka jira tiro badan oo idaacado iyo telefishino ah gudaha Jarmalka. Marka laga soo tago idaacadaha gaarka loo leeyahay, waxaa sidoo kale jira baahinta adeegga dadweynaha. Baahinta adeegga dadweynuhu waxaa u sugnaaday shaqada ah in dadka ugu badan ee suurtoogalka ah siiso macluumaad, waxbarasho, talo iyo madadaalo maalinle ah. Si loo awoodo in tan si madax bannaan loo fuliyo, waxaa jira khidmad baahineed (Rundfunkbeitrag) oo ay tahay inuu bixiyo guri-qoyseed kasta. Waajibinta ku aadan bixinta khidmadda baahinta waa waajib qaanuuni ah oo qeexaya in dhammaan guri-qoyseedka ku yaalan gudaha Jarmalka ay tahay inay bixiyaan tabarucaada. Qof kasta oo hela ceyrta bulshada waxaa laga dhaafi karaa waajibaadka ku aadan bixinta tabarucaada. Codsii waa in loo gudbistaa tan.



# Schönheitsreparaturen

# Die Schönheitsreparaturen

Dayactirka qurxintu waa shaqo yar oo dib u cusboonaysiin ah oo lagu sameeyo guri dabaqeedka la kireystay. Tan waxaa ka mid ah, tusaale ahaan, darbi ku xardhida xaanshimaha darbi-qurxinta iyo rinjiyeynta darbiyada iyo saqafyada, rinjiyeynta kuleel-keenayaasha ama daboolida qodyada ama hogaga musbaarada. Haddii heshiiska kirada aanu ku jirin wax qodobbo ah oo ku saabsan "dayactirka qurxinta", kiraystayaasha way guuri karaan iyaga oo aan dib u cusbooneysiin sameyn. Haddii aan waxba lagu heshiin gudaha heshiiska kiraynta, mulkiilayaasha guriga ayaa mas'uul ka ah xaaladda habboon ee guriga la kiraysto.




# SCHUFA-Auskunft

# Die SCHUFA-Auskunft

Xogta ku habboon kiridhitka iyo macluumaadka ku saabsan shakhsiyaadka iyo shirkadaha waxaa lagu kaydiyaa gudaha warbixinta SCHUFA. Sidaa darteed waxay wax ka dhaheysaa wax ku saabsan aaminaada kiridheet ee qof ama shirkad. Maadaama ay muhiim u tahay mulkiilayaasha guryaha in mar walba kiradooda lagu bixiyo waqtigii loogu talagalay, qaar badan ayaa u baahan nuqul ka mid ah warbixinta SCHUFA. Tani waxay u ogolaaneysaa inay arkaan in qofku horey u qabay wax deyn ah ama uu yahay mid ka nadiifsan wax deyn ah. Waxaad u codsan kartaa warbixinta SCHUFA si bilaash ah sannadkiiba hal mar. Haddii aad codsatay, waxaad galin kartaa nuqul ka mid ah galkaaga codsiga.






# Sozialwohnung

# Die Sozialwohnung

Guriyeeynta bulshadu waa guriyeeyn ay dawladu kabto dhaqaale ahaan. Tani waxay yaraynaysaa kirada. Waxaa jiro ururo guriyeeyn iyo iskaashatooyin kala duwan oo kireeya guriyeeynta bulshada. Waxaan u samaynay dulmar guud magaalada Augsburg. Waxay heysataa macluumaad ku saabsan sida la isaga diwaan geliyo. Dadka qaata cayrta bulshada ama dakhligoodu yar yahay waxay xaq u leeyihiin guriyeeynta bulshada. Si aad u awoodo inaad kiraysato guriyeeynta bulshada, waxaad u baahan tahay shahaado ku aadan xaq u yeelashada guriyeeynta.



# Staffelmiete

# Die Staffelmiete

Kiro kor loo qaado waa nooc kiro ah oo kirada lagu kordhiyo qadar go'an wakhtiyo joogto ah (kiro kor loo qaado). Wakhti u dhaxeeynta iyo qadarka kororka kirada waa in lagu nidaamiyaa gudaha heshiiska kirada. Waa in uu jiro ugu yaraan hal sano oo u dhaxeeya kordhinada kirada.



# Übergabeprotokoll

# Das Übergabeprotokoll

Marka la wareejinayo guriga dabaqa ah, aad bay muhiim u tahay in hab-maamuuska xil-wareejinta mar walba la dhammaystiro. Tan, waxaad ku dukumeentiyeeyn kartaa haddii wax yaala guriga dabaqa uu mar horeba ahaa mid jaban. Tani waa muhiim si aad u caddeeyso inaadan waxyeellada geysan markaad guureyso. Hab-maamuuska xil-wareejinta waxaa saxiixa adiga iyo mulkiilaha guriga. Haddii hab-maamuuska uusan soo diyaarin milkiilaha guriga (nuqul codso), waxaa lagugula talinayaa inaad wax walba si faahfaahsan u diiwaan geliso, sawirro ka qaado oo aadna saxiixitaan ka hesho mulkiilaha guriga ama qofka mas'uulka ka ah wareejinta.




# Ummeldung

# Die Ummeldung

Kadib guuritaanka, waa muhiim inaad dib isugu diiwaan geliso waqti fiican. Taas macneheedu waxa weeye in aad ogeysiiso xafiisyada muhiimka ah sida Xafiiska Diiwaangelinta Muwaadiniinta/Xafiiska Diiwaangelinta Ajaanibta, Jobcenter, shirkadda caymiska caafimaadka, bangiga, loo-shaqeeyahaaga, iwm. ciwaankaaga cusub. Waa inaad samaysataa ballan-qabsi si aad dib isaga diiwaan geliso Xafiiska Diiwaangelinta Muwaadiniinta/Xafiiska Diiwaangelinta Ajaanibta. Xaqiiji in ballan-qabsigani ay tahay 1-2 toddobaad kadib guuritaankaada. Caadi ahaan waxaad u qori kartaa iimayl xafiisyada kale adigoo ku dhex qeexaya ciwaankaada cusub.





# Untermietvertrag

# Der Untermietvertrag

Haddii dhowr qof ay ugu wada nool yihiin guri dabaq ah si qeyb-dabaqeed wadaago, waxaa jira laba nooc oo qandaraas kiro ah: Qof kastaa wuxuu la soo gebogebeeyaa heshiiska kireysiga mulkiilaha guriga. Markaa qof kastaa waa kiraystaha ugu weyn. Ama: Hal qof ayaa ah kireystaha ugu weyn wuxuuna dadka kale la saxiixanayaa heshiis kiro-hoosaad ah. Khasaaradu waa: Haddii kiraystaha ugu weyni uu joojiyo heshiiska kireysashada, heshiis-hoosaadkii hoos imaanaya ayaa si toos ah u dhammaanayaa. Haddii aan horeyba ugu sii noolahay guri dabaq oo kiro ah oo aan rabo in aan kireeyo qol banaan, waa in aan ogolaansho qoraal ah ka helaa mulkiilaha (yaasha) guriga. Haddii aan kiro-hoosaad ku sameeyo qol la'aanta ogolaanshaha mulkiilaha guriga, tani waxay noqon kartaa sabab aan caadi ahayn oo heshiiska guriga lagu joojiyo.



**Voll möbliert**

# Voll möbliert

Guryaha si buuxda loo alaabeeyay waxay ka dhigan tahay in guri lagu kireenayo isasoo leh alaabtiisa guri. Haddii aad kiraysato guri dabaq oo ay alaabtiisa guri u dhamaystiran tahay, waxa kale oo aad kiraysaneysaa alaabta guriga, haddii si loo dhaho. Si kastaba ha ahaatee, alaabta guriga waxaa weli iska leh mulkiilaha guriga sidaas darteed lagama yaabo in la iska tuuro. Haddii aad weli rabto in aad alaabtaada guriga dhigato guriga dabaqa ah, marka hore kala hadal mulkiilahaaga guriga waxa ay tahay inaad ka yeesho alaabta kirada ah.



# Warmmiete

# Die Warmmiete

Kirada ah tan aasaasiga iyo kharashaadka dheeraadka ah (= wadarta kirada) waa wadarta kirada aasaasiga ah, kharashyada kabka/dheeraadka ah iyo kharashyada kulaylinta. Sida caadiga ah, kharashyada kuleylku waa qayb ka mid ah kharashyada dheeraadka/kabka ah (= kharashyada hawlgelka) waxaana lagu dalacayaa mulkiilaha guriga.




# Wohn- berechtigungsschein

# Der Wohnberechtigungsschein

Shahaadada u-qalmitaanka guriyeynta, oo loo soo gaabiyo WBS, ayaa bixisa macluumaadka ku saabsan haddii aan xaq u leeyahay guriyeynta bulshada iyo haddii in kale. Si aan u helo WBS, waa inaan ka codsadaa magaalada, degmada ama maamulka ismaamul-magaaleedka ee igu habboon. Codsiga waxaa ku jira su'aalo badan oo ku saabsan xaaladdayda nololeed ee hadda. Waxaan bayaanin karaa sababta aan dhakhso ugu raadinayo guri dabaq ah (tusaale ogeysiiska heshiis joojinta, guri la'aan, iwm.). Waxay eegi doontaa inaan xaq u leeyahay guri dabaq ah oo bulsho ahaan la kabo. Si kastaba ha ahaatee, codsigu si toos ah iima siinayo guri dabaq ah. Waxaa 'dhinac la iigu dhigay' (= keydiyay) liiska sugitaanka. WBS waxay ansax tahay hal sano waxaana laga codsan karaa magaalada, degmada ama maamulka ismaamul-magaaleedka ka masuulka ah.






# Wohngeld

# Das Wohngeld


Qoysaska iyo dadka dakhligoodu hooseeyo waxay codsan karaan kaalmada guriyeynta haddii dakhligoodu aanu ku filnayn inuu daboolo kirada. Kaalmada guriyeyntu ayaa markaa loo bixiyaa si kabitaan ah oo ku aadan kirada. Sidaa darteed ma daboosho lacagta kirada oo dhan. Waxa aad ka codsan kartaa kaalmada guriyeynta xafiiska kaalmada guriyeynta (Wohngeldstelle). Haddii ay tahay in codsigaaga la ansixiyo iyo inta kaalmada guriga ee aad heleyso waxay ku xidhan tahay, tusaale ahaan, qaddarka dakhligaaga iyo haddii lagu isticmaali karo in lagu bixiyo kirada.



# Wohngemeinschaft

# Die Wohngemeinschaft

Gaar ahaan dadka keligood ah iyo kuwa dhalinyada ah, guriga la wadaago (oo loo soo gaabiyo: WG) waxa uu u noqon karaa beddel wanaagsan inaad yeelato guri dabaq oo adiga kuu gaar ah. Guryo qeebeydka dabaq ee la wadaago, qeyb la degane guri ee kasta waxa uu leeyahay qol u gaar ah oo waxaadna wadaagtaan oo keliya meelaha la wadaago sida musqusha, jikada ama qolka fadhiga.



# Zählerstand

# Der Zählerstand

Guri walba wuxuu leeyahay mitirka korontada iyo mitir loogu talagalay isticmaalka biyaha. Akhriska mitirku waa sida saacad oo kale wuxuuna xisaabiyaa inta korontada ah, biyaha ama gaaska ah ee lagu isticmaalo guri dabaqeedka. Haddii aad guri u soo guurto, waxaad u baahan doontaa akhrinta mitirka hadda si aad heshiis ula gabagabeyso bixiyaha korontada. Caadi ahaan waxaad ka heli doontaa mitirka korontada gudaha makhsinka.